(Norsk)

Informasjon til deg som bor i statlig mottak

"Reglement for økonomisk hjelp til personer i statlig mottak" (pengereglementet) gir regler og retningslinjer for økonomisk støtte til deg som bor i statlig mottak. Pengereglementet stiller krav til "Egenerklæring om inntekts- og formuesforhold" med mer. Hva som regnes som inntekt og formue beskrives i pengereglementet.

Utlendingsdirektoratet gir kun økonomisk støtte til deg som ikke har egne midler til livsopphold. Dersom du har inntekt og/eller formue betyr det at du helt eller delvis har midler til livsopphold. I slike tilfeller blir det ikke utbetalt økonomisk støtte, eller den reduseres avhengig av inntektens og/eller formuens størrelse. Ved lønnsinntekt av en viss størrelse vil du også bli krevd for husleie.

For å kunne gi deg riktig økonomisk støtte, må du opplyse UDI ved mottaksleder/økonomiansvarlig om du har inntekt eller formue ved å signere "Egenerklæring om inntekts- og formuesforhold". UDI har ansvar for at disse opplysningene kun blir brukt for å beregne riktig økonomisk støtte.

Du plikter å fremlegge dokumentasjon på at du fortsatt oppfyller vilkårene for å få økonomisk støtte når UDI ved mottaksleder/økonomiansvarlig ber om det. Du vil bli varslet innen rimelig tid før slik dokumentasjon må fremlegges. Dersom du ikke fremlegger slik dokumentasjon som UDI krever, vil økonomisk støtte til deg bli stanset.

Når UDI ved mottaksleder/økonomiansvarlig ber om det, må du innhente og fremlegge følgende dokumentasjon:

- kopi av siste lønnsslipp dersom du har lønnsinntekt
- kopi av arbeidsavtale dersom du har lønnsinntekt
- bankutskrift som viser saldo for siste måned dersom du har norsk bankkonto
- utskrift fra ligningsmyndighetene av siste års skatteoppgjør
- oversikt fra trygdekontoret over eventuelle trygdeytelser siste 12 måneder

Erklæring om inntekts- og formuesforhold

Jeg har forstått informasjonen ovenfor.

Jeg erklærer å ha opplyst om eventuell disponibel formue og/eller inntekt til UDI ved mottaksleder/økonomiansvarlig. Dersom jeg får formue og/eller inntekter i den tiden jeg bor i mottaket, er jeg forpliktet til å underrette UDI ved mottaksleder/økonomiansvarlig om dette, samt skaffe nødvendig dokumentasjon. Det samme gjelder ved endring i inntekt og/eller formue.

Jeg er klar over at bevisst uriktig informasjon eller tilbakeholdelse av opplysninger om mitt inntekts og/eller formuesforhold kan medføre anmeldelse til politiet. Jeg er inneforstått med innholdet og betydningen av egenerklæringen, og har etter beste evne gitt opplysninger som er av betydning i denne sammenheng.

(Somali)

Warbixin ku socota dadka ku jira xeryaha dawladda

"Xeerka caawinta dhaqaale ee dadka ku jira xeryaha dawladda" (xeerka lacagta) wuxuu dhigayaa xeerar iyo awaamiir la xiriirta caawinta dhaqaale ee la siiyo dadka ku jira xeryaha dowladda. Xeerka lacagtu wuxuu shuruud ka dhigayaa "Caddaynta qofka ee la xiriirta dakhliga iyo hantida" iyo qaar kale. Xeerka lacagta ayaa lagu tilmaamay waxa dakhli iyo hanti noqon kara.

Agaasinka ajnebigu wuxuu caawin dhaqaale siiyaa oo keliya qofka aan masruuf haysan. Haddii aad dakhli iyo/ama hanti leedahay, waxay taasi la mid tahay inaad haysatid qaar ama masruufkii oo dhan. Mararka

noocan ah caawin dhaqaale lama baxsho, ama waa la dhimaa iyadoo loo eegayo caddadka dakhliga iyo/ama hantida la haysto. Haddii uu jiro dakhli mushaar gaaraya ilaa xad, waxaa sidoo kale lagaa dalbi doonaa kiro guri.

Si caawin dhaqaale oo sax ah laguu siiyo, waa inaad u sheegtaa UDI-da adoo sii marinaya hoggaamiyaha xerada/mas'uulka dhaqaalaha inaad hesho dakhli ama haysato hanti – waxaadna taa ku sheegeysaa adigoo saxiixaya "Caddaynta qofka ee ee la xiriirta dakhliga iyo hantida". UDI-da ayaa mas'uul ka ah in warbixinnadan loo isticmaalo oo keliya sidii loo xisaabin lahaa caawin dhaqaale oo sax ah.

Waxaa waajib kugu aha inaad keento caddayn muujinaysa inaad weli buuxiso shuruudaha caawinta dhaqaale, marka UDI oo uu matalayo hoggaamiyaha xerada/mas'uulka dhaqaalaha uu ku weydiiyo. Wakhti fiican ka hor ayaa laguu sheegi doonaa marka lagaa rabo inaad keento caddayn noocan ah. Haddii aadan keenin caddaynta noocan ah ee UDI-du rabto, caawinta dhaqaalaha waa lagaa joojijanayaa.

Marka UDI oo uu matalayo hoggaamiyaha xerada/mas'uulka dhaqaalaha uu ku weydiiyo, waa inaad soo qaaddaa oo keentaa caddaymaha soo socda:

- koobbiga warqaddii mushaarka ee ugu danbaysay haddii uu dakhli mushaar ku soo galo
- koobbiga heshiiska shaqada haddii uu dakhli mushaar ku soo galo
- warqadda bangiga ee tusaysa haraaga lacageed ee bishii u danbaysay, haddii aad koonto bangi ku leedahay Norway
- warqad ka timid mas'uuliyiinta canshuuraadka oo tusaysa xisaabxirkii canshuuraadka ee sanadkii u danbeeyay
- warqad ka tidid xafiiska caymiska dadweynaha (trygdekontoret) ee tusaysa wixii dhaqaale caymis dadweyne (trygdeytelser) ee halkaa laga helay 12 bilood ee ugu danbeeyay

Caddaynta qofka oo la xiriirta dakhliga iyo hantida

Waan fahmay warbixinta kor ku qoran.

Waxaan caddaynayaa inaan UDI-da oo uu matalayo hoggaamiyaha xerada/mas'uulka dhaqaalaha *u sheegay wixii hanti ah ee aan haysto iyo/ama dakhli..Haddii ay hanti iyo/ama dakhli i soo galaan muddada aan xerada ku noolahay, waxaa waajib igu ah inaan taa u sheego UDA-da* oo uu matalayo hoggaamiyaha xerada/mas'uulka dhaqaalaha*, islamarkaana aan keeno caddaymaha loo baahan yahay. Waxaa sidoo kale ah haddii dakhligayga iyo/ama hantidaydu ay isbeddesho.*

Waan ogahay in warbixin khaldan oo ula kac loo baxsho ama warbixin ku saabsan xaaladdayda dakhli iyo/ama midda hantidayda oo aan la sheegin ay keeni karto in booliiska laygu dacweeyo.Waan fahmay waxa caddayntan qofeed ku qoran iyo micnaha ay xambaarsan tahay, waxaanan inta karaankayga ah baxshay warbixinno micno u leh arrintan.

DUF nummer ______________________
(Lambarka DUF)

Dato __________________
(Taariikh)

Signatur asylsøker_____________________________
(Sixiixa magangelyadoonaha)

Signatur for mottaket __________________
(Sixiixa xerada)